Public Health Agency

# Tallaalka

## loogu talagalay carruurta da'doodu tahay 18 bilood



immunisation
the safest way to protect your child

Laga bilaabo 2026

## Tallaalka DTaP/IPV/Hib/HepB (6-in-1)

Ilmahaaga waxay ahayd in lagu tallaalo tallaalka DTaP/IPV/Hib/HepB markii ay da'doodu ahayd 8, 12 iyo 16 toddobaad.

Tallaalka 6-in-1 wuxuu ka hortaggaa 6 cudur oo kala duwan:

- gawracatada
- teetanada
- xiiqdheerta (xiiq-dheer)
- cudurka dabaysha
- Haemophilus influenzae nooca b (Hib)
- cagaarshowga B

**Ilmahaaga waa inuu qaataa qiyaasta afraad ee tallaalka 6-in-1 marka uu jiro 18 bilood (iyadoo la qaadanaya qiyaasta labaad ee tallaalka MMRV).**

Tani waxay gacan ka geysan doontaa sii dheeraynta difaaca ay ka qabaan cuduradan ilaa laga gaaro xilliga qiyaasta tallaalka xiga ee ku beegan qiyaastii 3 sano iyo 4 bilood jir.

### Waxtarka tallaalka DTaP/IPV/Hib/HepB (6-in-1)

Daraasado ayaa muujiyay in tallaalka 6-in-1 uu aad waxtar ugu leeyahay ka ilaalinta ilmahaaga ee 6-da cudur ee halista ah.



Qiyaaso dheeraad ah ayaa loo baahan yahay si loo kordhiyo difaaca oo loo gaarsiiyo ilaa da'ada qaangaarnimada. Tallaalka 4-in-1 ee la bixiyo da'ada 3 sano iyo 4 bilood wuxuu gacan ka geysan doonaa sii dheeraynta difaaca ka dhanka ah teetanada, gawracatada, cudurka dabaysha iyo xiiqdheerta inta lagu jiro sannadaha dugsiga. Tallaalka la bixiyo da'ada 14 sano jirka wuxuu gacan ka gaysan doonaa inuu ka ilaaliyo gawracatada, teetanada iyo cudurka dabaysha marka ay waynaadaan.

### Gawracatada

Gawracatada waa cudur halis ah oo badanaa ku bilaabma cuna xanuun wuxuuna si dhakhso ah u sababi karaa dhibaatooyin neefsasho. Wuxuu dhaawici karaa wadnaha iyo habdhiska neerfaha, xaaladaha aad u daranna, wuxuu sababi karaa dhimasho. Kahor inta aan tallaalka gawracatada la soo saarin, waxaa jiray ilaa 1,500 kiisas oo gawracato ah sannadkiiba ee gudaha Waqooyiga Ireland.

### Teetanada

Teetanada waa cudur saameeya habdhiska neerfaha kaas oo sababi kara murqo xanuun, dhibaatooyin neefsasho wuxuuna sababi karaa dhimasho. Waxaa dhashaa marka jeermisyada laga helo ciidda iyo digada ay galaan jirka iyagoo u maraya meelaha jeexan ama gudbtay ee uu jirku ka furan yahay. Teetanada looma gudbin karo qof ilaa qof.

## Xiiqdheerta (xiiqdheer)

Xiiq-dheerta waa cudur sababi kara qufac dheer iyo ku dhegista neefsashada, taasoo adkeyneysa in la neefsado. Xiiq-dheerta waxay socon kartaa ilaa 10 toddobaad. Carruurta ka yar 1 sano ayaa halista ugu badan ugu jira xiiqdheerta. Carruurtan, cudurka aad buu ugu daran yahay wuuna dili karaa. Inta badan ma aha mid aad ugu daran carruurta waaweyn.

Waxaa jiray in ka badan 3,000 kiis oo la xaqiijiyay oo ku saabsan xiiq-dheerta oo laga soo sheegay Waqooyiga Ireland sannadkii 2024. Kororkaas dhawaanahan ku yimaaday kiisaska ayaa muujinaya sida ay muhiim u tahay in la xaqiijiyo in ilmahaaga uu qaato dhammaan tallaallada loo qorsheeyay.

## Cudurka dabaysha

Cudurka dabaysha waa fayras weerara habdhiska neerfaha wuxuuna sababi karaa curyaanimo joogto ah oo xagga muruqyada ah. Haddii cudurka uu saameeyo muruqyada laabta ama maskaxda, cudurka dabaysha wuxuu sababi karaa dhimasho.

Kahor inta aan la soo bandhigin tallaalka cudurka dabaysha, waxaa jiray ilaa 1,500 kiisas oo cudurka dabaysha ah oo sannad kasta curyaanimo joogto ah ku dhex sababayay gudaha Waqooyiga Ireland.

## Hib

Hib waa caabuq ay sababto bakteeriyada nooca b ee Haemophilus influenzae. Cudurkaas wuxuu sababi karaa tiro cuduro waaweyn ah sida sumowga dhiigga (septicaemia), oof-wareenka iyo meningitis (caabuqa maskaxda). Tallaalka Hib wuxuu ilmahaaga ka difaacayaa keliya nooca meningitis-ka (caabuqa maskaxda) ee ay sababto bakteeriyada nooca b ee Haemophilus influenzae – kama difaaco waxyaabaha kale ee sabab meningitis (caabuqa maskaxda).

Cudurrada uu Hib sababo waxay keeni karaan dhimasho haddii aan si dhakhso ah loo daweyn. Kahor inta aan la soo saarin tallaalka Hib, waxaa jiray qiyaastii 800 kiisas oo Hib ah oo ku dhaca carruurta yaryar sannad kasta. Tan iyo markii la soo saaray tallaalka, tirada carruurta ee ka yar 5 sano ee qaba Hib ayaa hoos u dhacday ilaa 99%.

## Cagaarshowga B

Cagaarshowga B waa caabuq ku dhaca beerka oo uu sababo fayraska cagaarshowga B. Haddii uu ku dhaco carruurta, caabuqa wuxuu sii jiri karaa sannado badan wuxuuna mararka qaarkood sababi karaa dhibaatooyin sida nabar yeelashada beerka (cirrhosis), iyo kansarka beerka.

In kasta oo tirada carruurta ee la nool fayraska cagaarshowga B ay aad ugu yar tahay gudaha UK, tallaalka waxaa la siin jiray carruurta khatarta sare ku jirta tan iyo 1980-meeyadii. Sannadkii 2017, tallaalka cagaarshowga B ayaa lagu daray barnaamijka tallaalka caadiga ah si dhammaan carruurta uga faa'iidaystaan difaaca uu ka bixinayo fayraskan.

Qaadashada 4 qiyaasood oo tallaalka 6-in-1 ah waxay bixisaa difaac waara oo ka dhan ah caabuqa cagaarshowga B, laakiin maaha noocyada kale ee cagaarshowga.

### Sidee loo bixiyaa tallaalka

Tallaalka waxaa lagu duraa muruqa bowdada ama cudada sare ee ilmaha.

### Ka dib qaadashada tallaalka 6-in-1

Ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu yeesho waxyeellooyin gaar ah, kuwaas oo badanaa ah kuwo fudud, waxaana ka mid ah:

- casaan noqoshada, bararida ama jilicsanaanta halk laga siiyay/looga duray tallaalka
- la kulmida xoogaa caajis ah ilaa 48 saacadood ka dib markii la siiyo tallaalka
- yeelashada qandho khafiif ah
- kuus/buro yar oo ka soo muuqata meesha ilmahaaga uu la qaatay tallaalka; tani waxay socon kartaa dhowr toddobaad laakiin si tartiib ah ayay u baabi'i doontaa

Haddii aad u malaynayso in ilmahaaga uu falcelin kale kala kulmayo tallaalka 6-in-1 oo aad ka walaacsan tahay, la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka.

## Tallaalka MMRV

Haddii ilmahaaga uu raaco jadwalka tallaalka ee hadda jira (dhashay markay taariikhdu ahayd ama ka dib 1-dii Janaayo 2025), waa inay qaataan qiyaastooda ugu horreysa ee tallaalka MMRV wax yar ka dib sannadguuradooda koowaad isla waqtiga ay qaadanayaan tallaalladooda MenB iyo PCV. Qiyaasta labaad (iyo tan ugu dambeysa) waxaa la siiyaa da'da 18 bilood, waxaa lala siinayaa tallaalka 6-in-1.

MMRV wuxuu ilmahaaga ka difaacayaa jadeecada, qaamo-qashiirka, jadeeco-jarmalka (jadeecada Jarmalka) iyo varicella. Varicella waa fayraska sababa busbuska.

Haddii ilmahaaga uu **dhashay intii u dhaxaysay 1 Luulyo 2024 iyo 31 Diseembar 2024**, oo ay qaateen qiyaas tallaalka MMR ah wax yar ka dib sannadguuradooda koowaad, waxaa la siin doonaa qiyaas tallaalka MMRV ah xilliga mid kasta oo ka mid ah ballamahooda 18 bilood, iyo 3 sano iyo 4 bilood.

Tani waxaa loogu talagalay in lagu siiyo difaac wanaagsan oo ka dhan ah busbuska (busbus). Qaadashada 3 tallaal oo ay ku jiraan MMR ma sababayso wax walaac xagga badbaadada ah.

## Noocyada tallaalka MMRV

Tallaalka MMRV wuxuu ka kooban yahay noocyo la daciifiyay oo ah fayrasyada jadeecada, qaamo-qashiirka, jadeeco-jarmalka iyo varicella. Maadaama fayrasyada la daciifiyay, dadka qaatay tallaalka ma qaadsiin karaan dadka kale.

Gudaha Waqooyiga Ireland, waxaan ku isticmaanaa 2 tallaal oo MMRV ah. Labada tallaalba si fiican ayay u shaqeeyaan. Mid ka mid ah tallaallada waxaa ku jira maadada jelatiinka doofaarka (jelatiinka waxaa laga soo qaatay doofaarka). Haddii aad doorbideyso in ilmahaaga uu qaato tallaalka aan ku jirin maadada jelatiinka doofaarka, la hadal kalkaaliyahaaga caafimaadka ama dhakhtarkaaga.

## Sidee loo bixiyaa tallaalka

Tallaalka waxaa lagu duraa muruqa bowdada ama cudada sare ee ilmaha.

## Waxtarnimada tallaalka MMRV

Tan iyo markii la soo saaray tallaalka MMR sanadkii 1988, kiisaska jadeecada, qaamo-qashiirta iyo jadeeco-jarmalka dhammaantood waxay hoos ugu dhaceen ilaa heer aad u hooseeya. Waxaa la filayaa in maadaama lagu soo daray qayb cusub oo varicella ah, kiisaska busbuska ay si weyn u yaraan doonaan. Barnaamijka wuxuu yareyn doonaa kiisaska busbuska ee aadka u daran, dhibaatooyinka la xiriira iyo isbitaal dhigista.





## Jadeecada

Jadeecada waxaa sababa fayras oo si fudud u faafa. Ku dhawaad qof kasta oo uu ku dhaco wuxuu yeelan doonaa qandho sareysa, finan, guud ahaanna wuu xanuunsan doonaa. Carruurta badanaa waxay qiyaas ahaan 5 maalmood la jiifaan sariirta waxaana laga yaabaa inay ka maqnaadaan dugsiga muddo ilaa 10 maalmood ah. Dadka waaweyn ayaa waxay u badan tahay inay la xanuunsan doonaan muddo intaas ka dheer.

Suurtagal ma aha in la sheego cidda si xun u saameyn doonta jadeecada. Qiyaas ahaan 1 ka mid ah 5-tii qof ee qabta cudurka jadeecada waxaa la dhigi doonaa isbitaalka. Dhibaatooyinka ka dhasha cudurka waxaa ka mid ah caabuqyada laabta, qallalka, 'encephalitis' (caabuqa maskaxda) iyo dhaawaca maskaxda. Xaaladaha aadka u daran, jadeecada waxay sababi kartaa dhimasho.

Kahor inta aan la bilaabin tallaalka jadeecada sanadkii 1968, qiyaastii 500,000 oo kiis iyo 100 dhimasho ah ayaa dhacay sanadihii faafitaanka cudurka. Sannadkii 1987 (sanadkii ka horreeyay soo bandhigida tallaalka MMR ee gudaha UK), 86,000 oo carruur ah ayaa qaaday jadeeco waxaana dhintay 16.

Jadeecadu waa mid ka mid ah cudurrada ugu faafitaanka badan ee adduunka. Qufac ama hindhiso, oo ka timaadda qof qaba cudurka, ayaa fayraska jadeecada ku faafin kara aag aad u ballaaran. Haddii ilmahaaga aan ka difaacnayn, fursadda ah inuu qaado cudurka jadeecada aad ayay u sarreysaa haddii uu u dhowaado qof qaba ama ku dhacaya cudurka jadeecada.

## Qanjo-qashiirka

Qaamo-qashiirka waxaa sababa fayras keeni kara qandho, madax-xanuun iyo qanjirada wajiga, qoorta iyo daanka oo barara. Cudurka wuxuu sababi karaa dhego-beel joogto ah, meningitis-ka fayras ah (caabuq ku dhaca dahaarka maskaxda) iyo caabuqa maskaxda. Marar dhif ah, wuxuu sababaa barar xanuun badan oo ku dhaca xiniinyaha ragga iyo ugxan-sidaha dheddigga. Qaamo-qashiirka wuxuu socdaa qiyaastii 7 ilaa 10 maalmood. Kahor inta aan la soo saarin tallaalka MMR, qiyaastii 1,200 oo qof oo ku nool UK ayaa sannad kasta isbitaal la dhigi jiray sababo la xiriira cudurka qaamo-qashiirka. Qaamo-qashiirka wuxuu u faafaa si la mid ah cudurka jadeecada waxaana loo kala qaadaa si la mid ah cudurka ifilada.

## Jadeeco-jarmalka

Jadeeco-jarmalka waxaa sidoo kale sababa fayras. Carruurta badanaa wuxuu u yahay mid fudud oo aan la dareemin. Wuxuu sababaa finan muddo gaaban sii jiraya, qanjirada oo barara iyo cuna xanuun.

Marka haweeney uur leh ay qaaddo cudurka jadeeco-jarmalka wuxuu cudurka saameyn ku yaalan karaa ilmaheeda aan weli dhalan, isagoo dhaawac halis ah u geysanaya aragooda, maqalkooda, wadnahooda iyo maskaxdooda. Xaaladdan caafimaad waxaa loo yaqaanaa cudurka jadeeco-jarmalka ee lagu dhasho (congenital rubella syndrome, CRS). Marka caabuqa la qaado inta lagu jiro 3-da bilood ee ugu horeeya ee uurka, wuxuu waxyeello u geystaa ilmaha aan weli dhalan marka loo eego 9 ka mid ah 10-kii kiisba.



5-tii sano ee ka horreysay soo saarista tallaalka MMR, qiyaastii 43 carruur ah sannadkii ayaa gudaha UK ku dhalanaysay iyagoo qaba cudurka jadeeco-jarmalka ee lagu dasho.

Jadeeco-jarmalka wuxuu u faafaa si la mid ah cudurka jadeecada waxaana loo kala qaadaa si la mid ah cudurka ifilada.

## Varicella (busbus)

Varicella (oo loo yaqaano busbus), waa cudur aad u faafa oo uu sababo fayras. Varicella/busbuska waa cudur caam ah wuxuuna saameeyaa carruurta badankood inta lagu jiro carruurnimada, inkastoo marka ugu horreysa la qaadi karo da'a kasta. Cudurku wuxuu aad ugu sii darnaan karaa dadka waaweyn, gaar ahaan haweenka uurka leh iyo kuwa habdhiska difaaca jirkooda uu daciifka yahay. Waxaa lagu kala qaadaa taabashada tooska ah ee dadka, ama si dadban iyada oo la isku marsiinayo dhibcaha hawada.

Inta badan kiisaska busbuska ee carruurta waa kuwo khafiif ah oo xanuunka ayaa iska baaba'a iyada oo aan loo baahanin wax daaweyn ah oo laga helo xirfadle caafimaad, inkastoo carruurta badankood ay xanuunsadaan ilaa dhowr maalmood ayna ka maqnaan doonaan dugsiga ama xarunta xannaanada 5 maalmood ama wax ka badan. Waalidiinta waxaa laga yaabaa inay ku qasbanaadaan inay fasax ka qaataan shaqada si ay u daryeelaan carruurtaas.

Carruurta qaar ayaa dhibaatooyin kale kala kulmaya busbuska oo ay ka mid yihiin caabuqa bakteeriyada ee nabarrada maqaarka (dhibco) iyo, xaalado dhif ah, encephalitis (bararka maskaxda), oof-wareen (caabuqa sambabada) iyo istaroog. Dhibaatooyinkan waxay sababi karaan isbitaal dhigid, marar aad dhif u ahna waxay sababi karaan dhimasho.



## Ka dib qaadashada tallaalka MMRV

Tallaalka MMRV wuxuu ka kooban yahay 4 tallaal oo kala duwan oo la isugu geeyay hal duritaan. Tallaalada waxay shaqeeyaan waqtiyo kala duwan. Qiyaastii 5 ilaa 11 maalmood ka dib qaadashada tallaalka, carruurta qaar ayaa yeesho qandho, waxay yeeshaan finan u eg finanka jadeecada waxayna ka go’aan cunista cuntadooda marka qaybta jadeecada ee tallaalka ay bilowdo inay shaqeyso.

Si dhif ah, qiyaastii 3 toddobaad ka dib ku duritaanka tallaalka, ilmaha wuxuu yeelan karaa astaamo u eg astaamaha qaamo-qashiirka (qandho iyo qanjirada oo barara) marka qaybta qaamo-qashiirka ee MMRV ay bilowdo inay shaqeyso.



Si dhif ah, finan yaryar oo u eg nabarro ayaa soo muuqan kara 6 toddobaad gudahood ka dib qaadashada tallaalka, badanaa waxaa sababa qaybta jadeecada ama jadeeco-jarmalka ee tallaalka. Haddii ay waxaas ay ka soo baxaan, ilmahaaga u geey dhakhtarka.

Finan khafiif ah oo u eg kuwa busbuska ayaa laga yaabaa inay soo baxaan ka dib qaadashada tallaalka, finankaas oo ka soo baxa meel u dhow goobta duritaanka laakiin waxay ka soo muuqan karaan meelo kale. Finankan uma baahna daaweyn waxayna u baaba'aan si iskood ah. Haddii ilmahaaga uu yeesho finan, ka taxaddar ahaan ka ilaali inuu xiriir dhow/taabasho la sameeyo dadka u nugul caabuqa busbuska, sida dadka habdhiska difaaca jirkooda uu daciifka yahay, haweenka uurka leh ee aan waligood qaadin busbuska iyo dhallaanka aan hooyooyinkood qabin busbuska. Si kastaba ha ahaatee, fursadda ah in busbuska laga qaado finankan ka dib marka la qaato tallaalka MMRV aad ayay u hooseysaa.



Qiyaastii 1 ka mid ah 1,000kii qofba wuxuu la kulmi doonaa suuxdin ay sabab u tahay heerkul sareeya (bogga 14 sida loo daaweeyo qandhada). Ma jirto wax caddayn ah oo muujinaya in tani ay sababayso dhibaatooyin muddo dheer sii jiraya. Ilmaha qaba jadeecada ayaa shan jeer uga dhow inuu la kulmo suuxdinta ka dhalata cudurka (5 ka mid ah 1,000kii qofba).

Tallaalada waxay sidoo kale sababi karaan falcelin xasaasiyadeed. Falcelinadaas aad bay naadir u yihiin, wax ka yar 1 ka mid ah halkii milyan oo tallaal ah. In kasta oo falcelinada xasaasiyadeed ee aadka u daran (anaphylactic) ay yihiin kuwo walaac leh marka ay dhacaan, dadka bixiya tallaallada waxaa loo tababaray inay la tacaalaan falcelinada aadka u daran, daaweynta ayaana waxay u horseedi doontaa soo kabasho degdeg ah oo buuxda.

Marar dhif ah, carruurtu waxay yeelan karaan encephalitis (barar maskaxda ah) ka dib qaadashaa tallaalka MMRV. Si kastaba ha ahaatee, haddii ilmo aan la tallaalin uu ku dhaco cudurka jadeecada, fursadda ah inuu la kulmo encephalitis ayaa aad u sarreysa.

Waxyeellooyinka gaarka ah ee ka dhasha qiyaasta labaad ayaa xitaa aad u yar oo badanaa waa kuwo khafiif ah.

**Tallaal qaadashada waa habka ugu badbaadada badan ee lagu difaaci karo ilmahaaga.**

## Xasaasiyadda Ukunta

Tallaalka MMRV waxaa la siin karaa carruurta xasaasiyad aad u daran (falcelin xasaasiyadeed) kala kulmay ukunta. Tallaalka MMRV waxaa lagu beeraa unugyada digaagga, ee maaha ukunta qaybteeda cad ama jaallaha ah, sidaas darteed, falcelinada daran ee dhaca ka dib qaadashada tallaalka ayaa la muujiyay inay aad naadir u yihiin. Haddii aad wax walaacyo ah qabtid, la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka.

## Walaacyada ku saabsan culeys saarista xad-dhaafka ah ee habdhiska difaaca ilmahaaga

In ilmahaaga la siiyo tallaalka MMRV, marka la siinayo tallaallada kale ee la siiyo da'daas wax culays xad dhaaf ah kuma keeni doonto habdhiska difaaca jirka.

Laga bilaabo xilliga dhalashada, habdhiska difaaca jirka ee ilmaha wuxuu ka ilaaliyaa jeermiska ku hareeraysan. Haddii aysan haysan difaac, carruurtu ma awoodi doonaan inay la tacaalaan tobanaanka kun ee bakteeriyada iyo fayraska ah ee dulsaaran maqaarkooda, sankooda, cunahooda iyo mindhiciradooda. Difaacan wuxuu soconayaa inta ay noolyihiin oo dhan.

Aragti ahaan, ilmaha wuxuu si wax ku ool ah uga jawaab celin karaa ilaa 10,000 tallaal hal mar. Habdhiska difaaca ilmaha si fudud ayuu ula qabsan karaa tallaalka MMRV iyo tallaallada kale ee muhiimka ah ee la siiyo isku mar.

**Waalidiinta iyo daryeelayaasha waxay soo sheegi karaan dhibaatooyinka looga shakisan yahay tallaalada iyo daawooyinka iyagoo u maraya Yellow Card Scheme.**

I ISKAAN GAREEY

Waxaa sidaas lagu samayn karaa khadka iyadoo la booqanayo **yellowcard.mhra.gov.uk** ama iyadoo khadka caawimaada ee Yellow Card laga wacayo **0800 731 6789**. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa koodhka QR ama adigoo la soo degaya ablikeeshinka Yellow Card.

## Waxaan ka walwalsanahay in ilmahayga uu ka cabsan/xanaaqi doono labada duritaan

Ilmahaaga wuu ooyi karaa ama xanaaqi karaa ilaa dhowr daqiiqo, laakiin badanaa way xasilli doonaan ka dib marka la sasabo. Aad ayay muhiim u tahay inaad gacan ka geysato dhisidda difaaca ilmahaaga.

## Waxyeellooyinka gaarka ah

Carruurta qaar waxay yeelan doonaan waxyeellooyin gaar ah ka dib duritaanka. Waxaa laga yaabaa inay:

- yeeshaan casaan noqoshada, bararida ama jilicsanaanta meesha laga duray (tani si tartiib ah ayay u baabi'i doontaa iskeed)

- noqdaan kuwo xanaaq badan oo dareema xanuun
- yeeshaan heerkul sareeya (qandho)

## Qandho

Qandho waa heerkul ka sareeya 37.5°C.

Qandhooyinka aad bay ugu badan yihiin carruurta yaryar, laakiin badanaa waa kuwo khafiif ah. Haddii wejiga ilmahaaga uu yahay kulayl marka la taabto ayna u muuqdaan casaan, waxaa laga yaabaa inay qabaan qandho.

Waa inaad heerkulkooda ku hubisaa heerkulbeeg.

## Daaweynta iyo ka hortagga qandhada

Qabooji ilmahaaga adigoo:

- xaqiijinaya inaysan saarnayn lakabyo badan oo dhar ama bustayaal ah
- siinaya cabitaanno badan oo qabow ah





Qiyaas yar oo ah barastamoolka dareeraha ah ayaa laga yaabaa inay gacan ka gaysato yaraynta qandhada ilmahaaga. Si taxaddar leh u akhri oo raac tilmaamaha ku qoran dhalada. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad siiso qiyaas kale 4 ilaa 6 saacadood ka dib.

**Xasuusnow, waligaa daawooyin aspirin ku jirta ha siin carruurta ka yar 16 sano.**

## Xaaladaha kale iyo xasaasiyadaha

Cudurka neefta, cambaarta, xasaasiyadda hawada, xasaasiyadda cuntada iyo xasaasiyadaha kale kama hor istaagayaan ilmahaaga inuu qaato tallaalada barnaamijka tallaalka carruurnimada. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka.

## Sababaha uusan ilmahaaga u awoodi karin in la tallaalo

Waxaa jira sababo aad u yar oo aan carruurta loo tallaali karin. Tallaallada lama siin karo carruurta la xaqiijiyay inay qabaan fal-celin xasaasiyadeed oo ka dhan ah qiyaas/doos hore oo tallaalka ah ama qayb ka mid ah tallaalka. Tallaalada ay ku jiraan gawracatada, teetanada iyo cudurka dabaysha (DTP), waxaa ku jiri kara neomycin, streptomycin ama polymixin B (antibiyootiko laga yaabo in xaddi yar loogu daro tallaallada).

## Carruurta habdhiska difaaca jirkoodu daciif yahay

Guud ahaan, carruurta “habdhiska difaaca jirkoodu daciifka yahay” (leh nidaam difaac oo daciif ah) waa inaysan qaadan tallaallo nool. Waxaana ka mid ah carruurta qaba xaalado caafimaad oo saameeya habdhiska difaaca jirka, sida daciif ahaanshaha aasaasiga ah ee difaaca jirka, ama kuwa laga daweynayo kansarka ama kuwa xubin jireed lagu tallaalay. Cudurrada sababa daciif ahaanshaha aasaasiga ah ee difaaca jirka waa cudurro aad dhif u ah oo sababa inaad qaaddo caabuqyo kale. Badanaa waxaa sababa hiddo-side cilladaysan waxaana la ogaadaa wax yar ka dib dhalashada.

Haddii aad u malaynayso in arrintani ay khuseyso ilmahaaga, waa inaad u sheegtaa dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka ka hor qaadashada tallaalka.

Ma jiraan sababo kale oo ay tahay in tallaallada aan loo bixin karin.



# Jadwalka tallaalada carruurnimada ee joogtada ah

Jadwalkani wuxuu waxyar ka duwanaan doonaa jadwalka loogu talagalay ilmaha dhashay ka hor 31 Diseembar 2024. Iskaan gareey QR koodhka ama booqo **nidirect.gov.uk/childhood-immunisation** si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

Tallaalka loogu talagalay carruurta ilaa hal sano jir ah




**8 toddobaad jir**
- 6-in-1
- Rotavirus
- MenB

**12 toddobaad jir**
- 6-in-1
- Rotavirus
- MenB

**16 toddobaad jir**
- 6-in-1
- Pneumococcal

Tallaalka loogu talagalay carruurta yaryar ka dib sannadguuradooda koowaad




**1 sano (ka dib sanadguuradooda koowaad)**
- MMRV
- MenB
- Pneumococcal

Tallaalka loogu talagalay carruurta da'doodu tahay 18 bilood




**18 bilood**
- 6-in-1
- MMRV

Ka ilaalinta ilmahaaga ifilada. Tallaalka loogu talagalay ilmahaaga yar ama ilmaha jira da'ada dugsiga xannaanada




**2+ sanno**
- Tallaalka hargabka carruurta (sannadle ah)

Talaalka loogu talagalay carruurta jira da'ada dugsiga xannaanada, saddex sano iyo afar bilood jir




**3 sano iyo 4 bilood**
- 4-in-1

**Haddii ilmahaaga uu seegay mid ka mid ah tallaalladan, la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka ama booqdaha caafimaadka.** Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalladan, booqo **pha.site/vaccinations**

**6-in-1** wuxuu ka difaacaa gawracatada, teetanada, xiiqdheerta (xiiq-dheer), cudurka dabeysha, Hib iyo cagaarshowga B

**4-in-1** wuxuu ka difaacaa gawracatada, teetanada, xiiqdheerta (xiiq-dheer) iyo cudurka dabeysha

Ha iloobin ballanta xilliga da'ada dugsiga barbaarinta marka ilmahaaga uu jiro 3 sano iyo 4 bilood.



Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka, booqo

pha.site/vaccinations

ama

www.nidirect.gov.uk/childhood-immunisation


Public Health Agency

**Public Health Agency**
12-22 Linenhall Street, Belfast BT2 8BS.
Tel: 0300 555 0114 (local rate).
www.publichealth.hscni.net

Find us on:



Daabacaaddan waxaa laga soo qaatay macluumaad asal ahaan ay soo saartay Hay'adda Amniga Caafimaadka ee UK waxaana lagu isticmaalaa Laysinka Furan ee Dowladda v 3.0



12/25